



Sanad dugsiyeed cusub, rajo cusub, waaga cusub ee Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Macallin iyo waalid aniga oo kale ah, bilowga sanad dugsiyeedku wuxuu wataa ballanqaadka bilow cusub iyo fursado cusub.

Dareenkan farxada leh ee jiraa waa mid si aad ah u socda iyada oo Dugsiyada Dadweynaha Portland ay u diyaar garoobayaan in albaabadiisa Arbacada loo furo qiyaastii 50,000 oo arday. Waxaa ka mid ah injineerada, kalkaaliyayaasha, farshaxaniistayaasha iyo macallimiinta aan mustaqbalka yeelan doono. Dhammaantood waxay baahan doonaan in ay lahaadaan fikirka muhiimka ah iyo xirfadaha wada shaqeynta ee u diyaarin doona in ay noqdaan hoggaamiyayaal isla markaana adduunyada ka dhigaan meel fiican.

Waxaan sameyn doonaa wax walba oo aan awoodno si aan u bixino xirfadahaasi.

Sanad dugsiyeedkeenu wuxuu la bilaabmayaa hoggaan cusub, furitaanka dugsiyo cusub oo qurux badan iyo, ta ugu muhiimsan, dareen cusub oo ujeedo leh. Kormeeraha guud ee soo socda ahaan, waxaan ku faraxsanahay in aan qayb ka noqdo hoggaanka cusub

Waa kuwani sida aan doonayo in aan u wado shaqadayda:

Waxaan isku tixgeliyaa in aan ahay hoggaamiyaha waxbarasho oo muhiim ah oo nidaamka dugsiyo leeyahay. Wax kasta oo aan sameeyo waxay u adeegi doonaan waxa ka dhaca fasalka.

Waxaan aaminsanahay in dugsiyada dadweynuhu ay noqdaan meelo u wanaagsan dadka oo dhan. Waa in ay noqdaan qalcadaha waxbarasho ee horumarisa aqoonta waxbarasho oo awood leh, horumarisa dareenka bulsho ahaaneed oo caafimaad leh, isla markaana laga helo fursado loogu talagalay carruurta oo dhan si loo ogaado hibada iyo xirfada gaarka ah ee ay leeyihiin.

Waxaan aqoonsanahay in ilmo kasta uu ku koro xaalado gaar ah, isla markaana in qaar ka mid ah ardaydeena ay la kulmaan caqabado taasi oo diiradda la saarayo dugsiya ka dhigi karta mid dhibaato badan. Waa mas'uuliyadeena in aanu xaqiijino in ay haystaan taageerada ay u baahan yihiin si ay u guuleystaan.

Waxaan aaminsanahay in aan noqon doono nidaamka dugsi dadweyne oo wanaagsan kaliya marka ay dhammaan carruurteeda iyo dhallinyaradeenu horumar gaarayaan.

Badankeena waxaan soo dhiganay dugsiyada dadweynaha. Waan ognahay sida dareenku yahay marka fasalku yahay mid soo dhaweyn iyo taageer leh. Dhammaanteena waxaanu leenahay geesiyaasheena dhanka waxbarashada.

Aniga ahaan, wuxuu ahaa macallinka fayaliinta 'violin' qofkii iga dhexe arkay tayada xirfadeed ee aan muusikada u lahaa; tababaraha lagdinta ee aqoonsaday awoodayda iyo adkeysigayga isla markaana u isticmaalay dhanka tartanka; macallinka meesha fog ka arkay horumarka luqadayda labaad isla markaana i baray suugaanta hodanka ah; macallinka cilmiga bulshada ee xoojiyay fahamkii aan ka qabay dunida –macallimiintani waxay iga caawiyeen horumarinta dareenka aadka ah ee ku aadan awooda shakhsiyeed iyo adkeysii.

Taasi waa waxa ay tarto waxbarashada dadweynuhu. Marka ay ugu fiican tahay, waxay beddeshaa dhabaha ay u socota nolosha dhammaan ardayda ee naftooda u isticmaala, iyada oo aan la eegayn taariikhdooda, zip code-kooda, ama xaaladooda dhaqan-dhaqaale. PPS waxay tani u samaysaa hab ixtiraam leh.

Waxaan rabnaa in aanu xataa samayno sidan si ka wanaagsan. Tani macnaheedu qiimeynta siyaasadaha iyo nidaamyada aan leenahay, noqoshada kuwo ardayga muhiimada siiya, diiradda saara-sinnaanta, xog ku shaqeeya isla markaana ku salaysan cilmo-baaris. Haddii aan sameyno, waxaan noqon karnaa kuwo hoggaanka u haya dugsiga degmooyinka ee ku yaala magaalada ee Maraykanka.

Hadafkeyga ugu muhiimsan waa in aan xaqiijiyo in sanadaha soo socda, in aysan macno yeelan qofka aad tahay ama halka aad ku nooshahay ama dugsiga aad dhigato – aad heli doonto macallimiin, maamulayaal iyo fasallo wanaagsan. Waxaan si adag diiradda u saari doonaa yaraynta, haddiiba aan la tirtirin, farqiga taariikhiga ah ee joogtada ah ee dhexeeya guul gaarida ardayda aan si fiican adeega u helin, ee cid matalaysaa aanay jirin iyo kuwa taariikh ahaan sida gaarka ah wax u hela.

Muhiimadaydu dayrtan waxay noqon doontaa in aan la kulmo macallimiinta, maamulayaasha, ardayda iyo qoysaska, isla markaana dejiyo qorshe muddo gaaban si loo horumariyo mudnaano muhiim ah oo loogu talagalay guusha ardayga. Laga soo bilaabo taasi waxaan guddigeena iyo bulshadeena waxbarasho kala shaqayn doonaa in la dejiyo qorshe istaraatiijiyadeed oo soo jiita fikirkeena wadajirka ah ee wanaagsan isla markaana haga shaqadeena muddada dheer.

Waxaan PPS imaanayaa indhahayga oo aad u furan. Waan fahamsanahay in degmadani ay caqabado haysteen, qaar ka mid ah ay yihiin kuwa gaar ah oo degaanka ku kooban, iyaga oo kuwa kale ay yihiin kuwo dhammaan dugsiyada degmooyinka ay la kulmaan.

Wali, waxaan aaminsanahay waxyaabaha kala duwan ee loogu talagalay dib u dhalashada PPS ay yihiin kuwa hada jira. Tani waxaa ka mid ah hoggaamiyayaasha cusub oo si aadka ah diiradda u saari doona waxbarashada, guddiga cusub ee dugsiga ee ay ka go'an tahay in ay hore u socdaan, iyo ka qayb qaadashada joogtada ah ee qoysaska iyo bulsho weynta ka tirsan dugsiyada dadweynaha. Calaamadahaas oo dhan waxay tilmaamayaan waqti ay jirto xasilooni iyo fursad aan ku bilaabi karno in aanu gaarno waxyaabo wanaagsan.

Sidaa darteed waxaan ku boorinayaa in aanay kaliya fiirsan waxa PPS ka dhacaya bilaha iyo sanadaha soo socda, ee laakiin ay noqdaan xubin firfircoon oo ka mid ah nidaamkan wax hagaajinta joogtada ah. Waxaan mahadcelin hore ugu sii gudbinayaa dhammaan dadka door joogta ka ciyaari doona guusheena: macallimiinta, hoggaamiyayaasha dugsiga, shaqaalaha, darawalada baska, tabarucayaasha, waalidiinta, hoggaamiyaasha ganacsiga, hoggaamiyayaasha dowladda magaalada, iyo kuwo kale oo badan. Waan kuu baahanahay. Mustaqbalka ardaydeenu wuxuu ku xiran yahay dadaalkaaga iyo taageeradaada.

Waa sanad dugsiyeed cusub iyo maalin cusub oo ay leedahay PPS. Rajo yeelo.

Guadalupe Guerrero wuxuu shaqada Kormeeraha Guud ee PPS bilaabi doonaa Oktoobar 1.